



## I. Hordhac –ww

Annaga oo ah wakiillo kala matalaya hay'adaha caddaaladda Puntland, xafiiska Xeer-ilaalinta Guud, xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha Puntland, Ururka Qareemada iyo hay'adaha warbaahinta ee ku kulmay aqoon-isweydaarsiga ujeeddadiisu ahayd kobcinta fahamka la xidhiidha Xeerarka Warbaahinta iyo Xuquuqda Aadanaha, kulankaas oo ay uu qabanqaabiyay Ururka Warbaahinta Puntland oo kaashanaya hay'adda Free Press Unlimited, laguna qabtay Hotel Rays magalada Garoowe muddadii u dhaxaysay 23 – 24 Nofembar 2017, waxaan ku ku baaqaynaa in ay naga go'an tahay ilaalinta ku dhaqanka sharciga, horumarinta xorriyadda fekerka iyo madaxbannaaninta warbaahinta si waafaqsan Shareecada Islaamka iyo nidaamka qaanuuneed ee Puntland.

Muddadii aqoon-isweydaarsigani socday waxaa aan si ballaadhan uga doodnay muhimadda ku dhaqanka xeerka warbaahinta. Waxaan dib u milicsannay hannaanka loo maray xorriyad-kaqaadidda suxxufga iyo hay'adaha warbaahinta, waxaan garwaaqsannay in qaar ka mid ah aanay waafaqsanayn dastuurka Puntland, Xeerka Warbaahinta Puntland iyo heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda Aadanaha.

## Haddaba, waxaa aynu halkan kaga dhawaaqaynaa:

### A. Wadar ahaan

1. Waxaan soo dhaweynaynaa oo aan dhiirrigelinaynaa dadaalka Ururka Warbaahinta Puntland ee ku aaddan barashada iyo isku-baraarujinta Xeerka Warbaahinta Puntland, qawaaniinta dalka iyo ku dhaqanka sarreynta sharciga.
2. Waxaa naga go'an in aan u abuurto jawi dabacsan, dhexdhexaad ah, xor ah, xaqna ah shaqada warbaahinta Puntland, si ka jawaabaysa baahida karaamada aadanaha ee cid walba.
3. Annaga oo garawsan in aadanuhu uu marayo marxalad muhiim ah, waxaa aan si mideysan u go'aan sannay in aan samayno dedaal dhab ah in si wanaagsan looga jawaabo horumarinta

xorriyadda fikirka marka la eego masaalixda muwaadinka, iyada oo la horumarinayo madaxbannaanida Warbaahinta.

## **B. Hay'adaha Caddaaladda**

1. Xaqiijinta in dacwadaha ka dhanka ah warfidiyeenka, saxaafadda iyo xarumaha warbaahinta loo fuliyo hannaan sharci ah oo daahfuran, isla markaana waafaqsan dastuurka Puntland iyo Xeerka Warbaahinta Puntland.
2. Waxaan xaqiijinaynaa ku dhaqanka Xeerka Warbaahinta Puntland marka la maareynayo dacwadaha la xidhiidha warfidiyeenka iyo warbaahinta.

## **C. Maamulayaasha Warbaahinta iyo Weriyaasha**

1. *Horumariyaan* anshaxa weriyaasha and tababarrada
2. Xaqiijiyaan had iyo jeer in xarumaha warbaahintu ay wararkooda u tebiyaan hannaan anshax sare leh.
3. Kor loo qaado fahamka (baraarugga) xubnaha iyo hawlwadeennada hay'adaha warbaahinta Puntland ee la xidhiidha Xeerka Warbaahinta Puntland 2016

## **D. Magaca & Saxiixa Wakiillada Hay'adaha**

Mohamed Hareed Faarah – Kuxigeenka Xeer ilaalinta Guud ee Puntland  
Mohamed Yusuf – Gudoomiye – Xafiiska Madaxa banaan ee Difaacaha Xuquuqul Insaanka Puntland.

Nuur Isse Mohamud – Gudoomiyah Kuxigeenka Maxkamada Sare Puntland.

Faisal Khalif Barre – Gudoomiyaha Ururka Saxafiyaanta Puntland